

Dheefta Cuntada Dheeraadka ah ee Xaaladda Degdegga ah Su'aalaha Inta Baddan La Isweydiyo La Cusboonaysiiyay Nofembar 2020

DSHS ayaa bixinaysa dheefaha cunto dheeraad ah oo lagu qaadanayo kaarka EBT oo loogu talagalay qoysaska hela in ka yar qaddarka ugu badan ee loogu talagalay inta uu qoyskoodu la eg'yahay. Tani waxaa lagu bilaabay dheefaha Maarso iyo Abriil waxayna u sii socon doonnaan si balle ah.

Maxay tahay sababta ay tani u dhaceyso?

Aqalka Golaha Wakiilada ayaa ansixiyay dheefo dheeraad ah oo dadka siinaya awood ay ku iibsadaan cunto dheeraad ah. Tani waxay yareyn doontaa inta jeer ee ay dadku u baahan yihiin in ay soo dukaameystaan alaabooyinka raashiinka ah. Sidoo kale waxay xaddidi doontaa tirada dadka dukaamada joogada waxayna hoos u dhigi doontaa fursadda qaadista cudurka COVID-19.

Goormeen heli doonaa dheefaha dheeraadka ah?

Taariikhaha bixinta ee barnaamijkan ayaa kala duwanaan kara iyada oo ku xiran ansaxinta dowladda federaalka iyo haddii maalinta koowaad ee bisha ay tahay maalin axad ah. Tani waxaa loola jeedaa waqtiga ugu horreeya ee aad heli karto dheefaha waa maalinta 2^{aad} ee bisha.

Waxaan hadda codsaday kaalmada cuntada ee bishan. Ma heli doonaa dheefo dheeraad ah?

Haddii aad xaq u leedahay kaalmo cunto, waxaad heli doontaa qaddarka dheefta ugu badan ee loogu talagalay inta uu qoyskaagu le'eg yahay.

Waxaanba horey u heli jiray qaddarka ugu badan ee dheefaha. Ma heli doonaa dheefo dheeraad ah?

Haddii aadba horey u qaadato qaddarta dheefta ugu badan, ma heli doontid dheefaha cuntada oo dheeraad ah.

Waa maxay qaddarada dheefta ee ugu badan?

Xaq-u-leh Xubnaha Qoyska	Dheefta Ugu Badan
1	\$204
2	374
3	535
4	680

5	807
6	969
7	1,071
8	1,224
9	1,377
10	1,530
Mid kasta oo dheeri ah	+ 153

Waxaan xaq u leeyahay Cuntada Aasaasig ah, balse ma heli wax dheefo ah. Ma heli doonnaa dheefo dheeraad ah?

Haa. Waxaad heli doontaa dheefta dheeraadka ah ee qaddarka ugu badan ee loogu talagalay inta uu qoyskaaga le'egyahay haddii aad caadi ahaan hesho \$0.

Waxaan helaa WASHCAP/Gargaarka Cuntada ee Ku-meelgaarka ah/Gargaarta Cuntada ee dheefaha Muhaajiriinta Sharciga ah. Ma heli doonnaa dheefo dheeraad ah?

Haa. Dheefta dheeraadka ah ayaa lagu dabaqi karaa dhammaan barnaamijyada gargaarka cuntada.

Dheefo dheeraad ah oo intee le'eg ayaan heli doonnaa?

Waxaad heli doontaa farqiga u dhaxeeya dheeftaada caadiga ah iyo qaddarka ugu badan ee loogu talagalay inta uu qoyskaagu le'eg yahay. Tusaale ahaan:

Adiga iyo lammaanahaaga labadiinnaba waad shaqeysaan waxaadna helayaan guud ahaan lacag dhan \$200 oo dheefaha cuntada ah 10-ka Oktoobar. Qoondada ugu badan ee loogu talagalay qoyska labada-qof ka kooban waa \$374. \$374 - \$200 waa \$174. Waxaad heli doontaan \$174 dheeraad ah oo dheefaha xaaladda degdegga ah. Waxaad heli doontaan \$200 caadiga ah oo lagu darey \$174 oo dheeraad ah guud ahaanna waa \$374 taariikhdaada caadiga ah, 10-ka Oktoobar.

Ma in aan dib u bixiyaa dheefahan?

Dheefahan dheeraadka ah waxaa loogu talagalay in aad adeegsato. Ma jirto sabab aad dib ugu bixiso.

Miyaan lumin doonnaa dheefahan dheeraadka ah haddii aad isla-markaa adeegsan?

Maya. Waxaa lagu oggol yahay 365 maalmood oo laga bilaabayo taariikhda adeegsigaaga ugu dambeeya si aad u adeegsato dheefaha caadiga ah iyo kuwa dheeriga ah.

Dheefahan dheeraadka ah saameyn ma ku yeellan doonnaan xaaladdeyda socdaal?

Maya.

DSHS ma soosaari doontaa qaddarada ugu badan ee bil kasta?

Waxaan dib-u-eegi doonnaa haddii aynu ku siin karan qaddarka ugu badan ee loogu talagalay inta uu qoyskaaga le'eg yahay oo si bille ah, oo ku xiran oggolaanshaha dowladda federaalka.

DSHS ma ii soo diri doontaa warqad marka aan helo dheefta dheeraadka ah.

Maya. Warqado ma direyno marka aynu bixinno dheefaha dheeraadka ah. Haddii aad dooneyso in aad oggaato goorta dheefahaagu ay soo geli doonnan koontadaada, waxaad waci kartaa lambarka ku qoran kaarkaaga EBT si aad u eegto baaqigaagga ama ku adeegso Koontadaada Dheefaha Macmiilka www.washingtonconnection.org.

Ma wacaa Xarunta Xiriirka Adeegga Macaamiisha?

Iyada oo sabab u ah mugga wacitaanadeenna ee ka baxsan sida caadiga ah, waxaan ku weyddiisanayna in aadan wacin xarunta wacitaanka adiga oo weyddiinaya dheefaha dheeraadka ah. Ka eeg macluumaadkii ugu dambeeyay koontooyinkeenna baraha bulshada ee [Facebook](https://www.facebook.com/dshs.wa) and [Twitter](https://twitter.com/dshs_wa) ama www.dshs.wa.gov.